



Australian Government



ParentsNext

Ka faa'iideysiga Qorsha-haaga Kaqeybqaadashada



La-taliyahaaga ParentsNext ayaa kaa caawin doona inaad abuurtid Qorshaha Ka Qaybqaadashada.

Qorshuhu wuxuu kaa caawin doonaa inaad aqoonsatid waxbarashadaada iyo yoolalkaaga shaqo isla markaana aad qaaddid tallaabooyinka soo socda ee aad ugu diyaar garoobaysid shaqaalaynta intaan ilmahaaga ugu yari bilaabmin dugsiga.

Qorshaha waxaa ka mid ah:

- Himilooyinkaaga waxbarasho iyo shaqo
- Hawlaha, soo gudbinta shuruudaha iyo ballamaha aad oggolaatay.

Waxqabadyada waxaa lagu waafajin doonaa adiga iyo baahida qoyskaaga. Waxay ka mid noqon karaan:

- Dhisidda **xirfadaha u diyaarsanaanta shaqada** sida qorista dib loo bilaabay, ku dhaqanka wareysiga ama helitaanka liisanka
- **Khibrad shaqo** ama **tabarucid**
- **Koorsooyinka tababarka, TAFE ama jaamacadda**
- **Helitaanka taageero** si loo helo adeegyo maxalli ah.

Haddii aad wax baraneysid, aad shaqeyneysid ama tabaruc tahay, kuwan waxaa lagu soo dari doonaa sida waxqabadyada qorshahaaga ah - **uma baahnid inaad qabatid howlo dheeraad ah.**

Haddii aad u baahan tahay caawimaad lacageed oo ku saabsan waxyaabaha la xidhiidha waxqabadkaaga, weydii adeeg bixiyahaaga haddii aad xaq u yeelan kartid caawimaad hoos timaadda Sanduuqa Ka Qaybqaadashada.

Adiga ayaa xakameynaya Qorshahaaga Kaqeybgalka



Markaad qorshe cusub la sameysid la-taliyahaaga ParentsNext, waxaad haysataa 10 maalmood oo shaqo oo aad kaga fikirtid ka hor intaadan saxiixin.



Haddii waxqabadku ku anfici waayo, kala hadal la-taliyahaaga sidii aad u beddeli lahayd.



Fadlan u sheeg la-taliyahaaga haddii xaaladahaagu is beddelaan oo ay saameyn ku yeeshaan awoodda aad u leedahay inaad raacdid qorshahaaga (tusaale ahaan, haddii aadan lahayn wax gaadiid ah ama dhaqaaq ah).

Waxii macluumaad intaa dhaafsiisan tag dese.gov.au/parentsnext